

## WIDA Alternate ACCESS for ELLs

### Waa maxay Qaab Beddelka ACCESS for ELLs?

Qaab Beddelka ACCESS for ELLs waa *qiimaynta xirfadda luqadda Ingiriisiga* oo loogu talagalay fasallada 1-12. Imtixaanka waxa la qaadaa sannad walba si looga caawiyo dugsiyada degmooyinku inay la socdaan *horumarka luqadda Ingiriisiga* ee ardayda loo gartay inay yihiin *Bartayaasha Luqadda Ingiriisiga*.

### Waa maxay ujeeddada imtixaankani?

Qaab Beddelka ACCESS for ELLs ayaa cabbirta kartida u ardaygu ku fahmayo ee u ku soo saaranayo Ingiriisiga lagu dhex isticmaalo waxbarashada dugsiga dhexdiisa. Afarta qaybood ee imtixaanka ayaa kala ah Dhagaysiga, Akhriska, Hadalka, iyo Qorista.

### Waa maxay sababta ay tahay inuu ilmahaygu qaato imtixaanka?

Ilmahaaga ayaa loo gartay inuu yahay *Barte Luqad Ingiriisi*. Ilmahaaga ayaa qaadan doona imtixaanka sannad kasta ilaa intay dhibcahiisu/dhibcaheedu qancinayaan shuruudaha si lagaga baxayo barnaamijka taageerada luqadda. La xiriir dugsiga ilmahaaga si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida ilmahaaga loogu gartay inuu yahay barte luqad Ingiriisi.

### Goorma ayuu ilmahaygu qaadan doonaa imtixaanka?

Gobol kastaa wuxuu u dejiyaa muddo go'an oo ay dugsiyadu ku qaadaan Qaab beddelka ACCESS for ELLs. Dugsiyada ayaa jadwalka u geliya markay ardaydu qaadan doonaan afarta qaybood ee imtixaanka, inta lagu jiro muddada go'an ee imtixaan qaadashada. Kala xiriir dugsiga ilmahaaga wixii macluumaad gaar ah oo dheeraad ah ee ku saabsan marka ilmahaaga ballanta looguqabtay inuu qaato Qaab Beddelka ACCESS for ELLs.

### Sidee dhibcaha imtixaanka loo isticmaalaa?

Dhibcaha laga helo Qaab Beddelka ACCESS for ELLs ayaa loo isticmaali karaa habab badan. Waalidiinta ayaa u isticmaali karta dhibcaha inay ugu doodaan ilmahooda, khaastan marka ay la kulamayaan kooxda dusiga ee dajisa barnaamijka Waxbarashada Gaarka U ah ilmaha ((IEP). Macalimiinta ayaa u isticmaala inay qorsheeyaan waxbaridda iyo qiimaynta. Degmooyinka dugsi ayaa u isticmaala dhibcaha si ay u qiimeeyaan barnaamijyadooda taageerada luqadda, si ay ula socdaan horumarka ardayga koradhsiga Ingiriisiga, iyo si loo ogaado haddii ardayga u qalmo inuu ka baxo barnaamijka taageerada luqadda Ingiriisiga. Dhibcaha ayaa sidoo kale loo isticmaalaa qancinta shuruudaha la xisaabtanka dowladda federaalka iyo ta gobolkaba.

### Su'aalaha ah in la Weyddiyo

Waalidiinta ayaa u isticmaali kara su'aalahaan soo socda inay helaan macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan wixii u ilmahoodu kala soo kulmay imtixaanka:

- Ayaa ka qaadi doona ilmahayga Qaab Beddelka ACCESS for ELLs.
- Halkee ayuu ilmahaygu ku qaadan doonaa imtixaanka?
- Qof ka socda dugsigu ma u sharraxay imtixaanka inankayga/inantayda?
- Miyay ogyihiin dhammaan macallimiintu inuu isagu/iyadu qaadanayo imtixaanka?
- Haddii u ilmahaygu leeyahay Barnaamijka Waxbarasho ee Gaarka u ah (IEP), maxaa waafajin ah ee la siin doonaa isaga/iyada muddada uu qaadanayo imtixaanka?
- Goorma iyo sidee ayaa aniga la igula wadaagi doonaa dhibcaha?

### Kelmado Muhiim u ah in La Ogaado

*Bartayaasha Luqadda Ingiriisiga* ayaa ah ardayda u qalanta inay dugsiga ka helaan taageero lugadda Ingiriisiga.

*Xirfadda luqadda* ayaa ah cabbirka heerka u ardaygu ka joogo hab-socodka horumarka luqadda.

*Horumarka luqadda* ayaa ah hab-socod qaata waqti. Ardayda ayaa uga gudba hab-socodkan heerar kala duwan.